

KU SOCOTO: Dhammaan Agaasimayaasha Waxbarashada Gaarka ah ee Degmada iyo ESD

Fariinta hoose waxaa adiga laguugu soo gudbinayaa aniga oo ka wakiil ah:

Tenneal Wetherell, Kaaliyaha Kormeeraha Guud, Xafiiska Hormarinta Fursadaha Ardayga

\*\*\*\*\*

TAARIKHDA:

KU SOCOTO: Dhammaan Agaasimayaasha Waxbarashada Gaarka ah ee Degmada iyo ESD

Soo koobitaanka soo socda waxaa uu bixinayaa macluumaad ku aadan shaqaalaha iyo waalidiinta ee ku saabsan canshuur dhaafka Oregon ee loogu talagalay waalidiinta haysta carruurta naafada ah. Xor ayaad u tahay inaad ula wadaagto macluumaadkan sida ku haboon degmadaada iyo waalidiintaada.

### **Canshuur dhaafka 2023 ee loogu talagalay Waalidiinta haysta Carruurta Naafada ah**

Xeerka Canshuurta Oregon waxaa uu bixiyaa canshuur dhaaf dheeraad ah oo loogu talagalay waalidiinta haysta carruurta naafada ah ee u qalma oo ku nool Oregon. Habraaca loo dalbado ka dhaafida ku aadan sanad canshuureedka 2023 waxa lagu sharaxay buugaagta yaryar ee Tilmaamaha iyo Canshuurta celinta Dakhliga Shaqsiya ee Oregon.

### **Waa tee cida u qalanta ka dhaafitaanka?**

Canuga waa uu u qalma haddii isaga ama iyada ay buuxiyaan **dhammaan** shuruudaha soo socda:

- U qalma sida ku tiirsanaanta waalidka(iinta) ee ku aadan sanad canshuureedka 2023;
- U qalma adeegyada barbaarinta hore (ku dhashay ilaa da'da 3), adeegyada waxbarashada gaarka ah ee carruurnimada hore (da'doodu tahay 3 ilaa 5) ama uu u helo waxbarashada gaarka ah sida ay ku qeexeen Guddiga Waxbarashada Gobolka halka uu ilmaha xadiraayo dugsiya; **iy**,
- Waxaa loo tixgaliyaa inuu naafanimada qabay laga bilaabo Diseembar 31, 2023 sida ku cad Xeerka waxbarashada Shaqsiyaadka Naafanimada qaba ee Dowlada dhexe (IDEA) iyo sharciyada Oregon ee la xiriira.

### **Waa maxay dukumeentiyada ay tahay in lala soo gudbiyo canshuur celinta si loogu qalmo ka dhaafitaankan?**

Sida buug-yaraha tilmaanta canshuuruhu uu dhigaayo, canuga waa inuu lahaadaa barnaamijka Waxbarashada Shakhsi ahaaneed (IEP) ama Qorshaha Adeegga Qoyska ee Shakhsi ahaaneed (IFSP), iyo sidoo kale bayaanka u qalmitaanka hadda ee cadeynaayo ardayga naafada ah. Haddii aadan haysan dukumeentiyadan la xiriir Degmadaada si aad u hesho nuqul ka mid ah xaashida daboolka IEP/IFSP, iyo bayaanka u qalmitaanka. Nuqulada ka midka ah xaashida daboolka IEP/IFSP iyo bayaanka u qalmitaanka looma baahna in lala soo gudbiyo canshuur celinta. Hase yeeshee, waalidiinta waxaa lagula talinayaa inay haystaan nuqul ka mid ah diiwaankooda canshuurta 2022 maadaama Waaxda Dakhliga ee Oregon ay weydiisan karto waalidiinta inay keenaan dukumeentiyada noocaas ah. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo la xiriira Waxbarashada Gaarka ah, fadlan la xiriir bixiyaha waxbarashada deegaankaaga.

### **Waaxda Dakhliga ee Oregon Tilmaamaha iyo Foomamka Onlaynka ah**

Wixii macluumaad dheeraad ah iyo caawinaad ee ku saabsan buuxinta foomamka canshuurta Oregon, la tasho xirfadle canshuureed ama kala xiriir **Waaxda Dakhliga Oregon 1-800-356-4222**. Foomamka

canshuurta dakhliga Oregon/daabacaadaha waxa laga heli karaa mareegta DOR ([www.oregon.gov/DOR](http://www.oregon.gov/DOR)). Hannaankaasi waxaa uu kuu ogolaanayaa inaad dalbato canshuur dhaafitaan dheeraadka ah oo ku aadan sanadka 2022.